

Sababta Kursiyada Baabuurta Aanay U Shaqeynayn Gawaarida Dhulka Aan Laamiga Lahayn

Looguma Dhisin Kursiyada Baabuurta

ATV-yadu looma naqshadeynin in lagu rakibo kursiyo carruur, sidaas darteed isticmaaliddooda kuma salaysna badbaado. Astaamaha badbaadada iyo awoodda ay u leeyihiin inay u adkeystaan shilalka ayaa si weyn uga duwan kuwa gawaarida rakaabka ee caadiga ah.

Tilmaamaha Soo Saarayaasha

Inta badan shirkadaha soo saara kursiyo carruurta waxay caddeeyaan in kursiyo dhooda lagu shahaado si gaar ah oo keliya loogu isticmaalo gawaarida rakaabka ee buuxiya heerarka badbaadada ee NHTSA. Maadaama gawaarida dhulka aan laamiga lahayn aysan ka mid ahayn fasalkaas, isticmaalka kursiyo carruurta ee ATV-ga wuxuu abuuri karaa dareen been ah oo badbaado ah iyadoo aan jirin ilaalin dhab ah haddii uu shil dhaco.

Waxyaabaha Ay Tahay In Ay Ogaadaan Farsamayaqaannada Badbaadada Rakaabka Carruurta (CPSTs)

Farsamayaqaannada CPSTs waa in ay wacyigeliyaan qoysaska si ay u fahmaan khataraha la xiriira isticmaalka kursiyo carruurta ee gawaarida dhulka aan laamiga lahayn. Waxaa muhiim ah in si cad loo muujiyo in badbaadada carruurta yaryar ay ku xirantahay raacitaanka tilmaamaha shirkadaha soo saara iyo sharciyada deegaanka, halkii laga isku dayi lahaa in la waafajiyo isticmaalka caadiga ah ee kursiyo carruurta baabuurta aan u naqshaysnayn arrintaas.



Xusuusinno Ku Saabsan Waditaan Ammaan ah



HUBI GAARIGAAGA

Ka hor intaadan kaxaynin, hubi in bareega, taayirada, iyo qaybaha kale ee gaariga ay si sax ah u shaqeynayaan.



KA FOGOOW WADOOYINKA LAAMIGA AH

Gawaaridan waxaa loogu talagalay in lagu wado carro iyo dariiqyada dabiiciga ah, ma aha wadooyin laami ah halkaas oo si fudud ay ugu rogman karaan.



KORMEER IYO TABABAR

Dad waaweyn waa in ay si joogto ah ula socdaan carruurta marka ay raacayaan ATV, dhammaan dadka raacayana waa in ay qaataan tababar ku saabsan badbaadada.

Koorsooyinka Tababarka ee MN DNR

Waaxda Kheyraadka Dabiiciga ah ee Minnesota (MN DNR) waxay bixisaa koorsooyin tababar badbaado oo loogu talagalay dhalinyarada iyo dadka waaweyn si kor loogu qaado adeegsiga mas'uuliyadda leh ee ATV-yada. Koorsooyinkan waxay daboolayaan dhaqamada muhiimka ah ee badbaadada, adeegsiga qalabka, iyo farsamooyinka wadista, oo ay ku jiraan:

Tababarka Badbaadada ATV-ga ee Dhalinyarada

Barnaamijkan waxaa loogu talagalay raacayaasha da'doodu u dhaxayso 10 ilaa 15 jir, wuxuuna daboolayaa aasaaska wadista ammaan ah, oo ay ku jiraan sida loo wado gaariga, qalabka badbaadada, iyo maaraynta khataraha.

Waxbarasho Gacan-ku-samayn ah

Koorsooyinka badankood waxay ka kooban yihiin jimicsiyo wax ku ool ah oo lagu wado ATV-ga iyadoo si dhaw loo kormeerayo, si loo hubiyo in ka qaybgalayaashu helaan waayo-aragnimo dhab ah oo badbaado ku jirto.

Shahaado

Marka la dhammeeyo koorsada si guul leh, ka qaybgalayaashu waxay heli karaan shahaado badbaado, taasoo looga baahan yahay dhammaan dadka wadda ATV oo dhashay ka dib 1-da Luulyo, 1987.

Wixii faahfaahin dheeraad ah iyo isdiwaangelinta tababarka, booqo dnr.state.mn.us/safety/vehicle/atv.